



Macluumaad cusub ee dhismaha Madison, goobta dadka u furan

Dhowr bilood oo kaliya gudahood, Juun dhexdeeda, Dugsigu wuxuu xirnaan doonaa wuxuuna dhisme ka socon doonaa muddo laba sanadood ah si buuxda loogu casriyeeyo dhismaha. Ardayda iyo shaqaaluhu waxay u guuri doonaan dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall kaasi oo loogu talagalay sanad dugsiyeedyada 2019-20 iyo 2020-21.

Si dadka looga caawiyo in ay waxyaabo badan ka ogaadaan saameynta dhismahaasi u leeyahay ee xaafadda iyo bulshada, kooxda naqshada ee Madison waxay qaban doontaa goobta dadka u furan Talaadada, Febraayo 19 laga bilaabo 6 ilaa 8 habeenimo isaga oo ka dhacaya madxafka Madison, 2735 NE 82nd Ave.

Cunto fudud ayaa la heli doonaa 5:30 galabnimo iyada oo wax soo bandhigistu bilaabmayso 6:00 galabnimo. Daryeel carruureed ayaa la bixin doonaa. Turjumaad dhanka Isbaanishka, Vietnamese, Russian, Chinese-Cantonese iyo Soomaaliga ayaa la heli doonaa.

Kaalay oo la kulan kooxda naqshada ee Madison iyo qandaraaslaha guud marka ay bixinayaan macluumaad cusub oo ku saabsan muuqaalada naqshada iyo dhismaha soo socda. Ogow sida casriyeynta soo socota ee Madison ay wax uga beddeli doono xaafadda iyo:

- Sida ay Madison u noqon doonto meel nolol buuxda la geliyay oo leh dhismaha dhanka waxbarashada oo la socda qarniga 21-aad.
- Saameynta uu ku yeelanayo bulshada labada sano ee soo socda.
- Qorshaha dhanka gaadiidka ee loogu talagalay ardayda Madison si ay gaaraan Dhismaha Marshall.

Macluumaadka cusub ee mashruuca hadda socda fadlan booqo [website-ka Casriyeynta Madison](#).